

War Saxaafadeed

Date: 22/02/2017

Guddiga Fulinta ee Dalladda PUNSAA oo shirkoodi saddex bilood laha ahaa ku yeeshay maalada Garoowe 19-20 Feb. 2017 ayaa soo saraay Baaq ka kooban qodobbo dhawr ah oo ay ku muujinayaan dareenkooda.

1. Cawaaqib xumada iyo Saamaynta Abaarta

Sida la ogyahay waxa waddanka ka dhacay Abaar aad u daran oo dalka oo dhan ku baahsan oo dad, duunyo, dalag iyo duurjoogba saamaysay. Taas oo ka dhalatay markii ay baaqdeen xilli roobaadyadii uu roobku dalka Soomaaliya ka di'i jiray. Waxa dhibaataada sii baritaaray in abaartu ay dhacday iyadoo aan laga sii gaashaaman.

Dalladda Daneeyayaasha aan Dawlaga ahayn ee PUNSAA waxa ay werwer xoog leh ka qabtaa saamaynta iyo cirib xumada sii duragsan ee ay yeelan karto haddii ay abaartu sii daba dheeraato oo la waayo ama soo daaho roobka Gu'gu.

Sidaas darteed waxa ay Dallada PUNSAA ugu baaqaysaa madaxda Soomaaliya, Federal iyo Dowlad Goboleedyoba in ay diyaariyaan qorshe guud oo loogu tabaabushesto haddii ay xaaladu ka sii darto. Kaas oo ku salaysan dhammaan baahiyaha immaan kara. Waxa sidaas oo kale aanu ugu baaqaynaa Ganacsatada iyo Maalqabeenada Soomaaliyeed in ay dowlad muhim ka qaataan samata bixinta ummadooda.

Dalladda PUNSAA waxa ay Hay'adaha Caalamiga ah ugu baaqaysaa in ay ku deeqaan oo weliba dedejiyaan dhaqaale iyo farsamo looga gudbi dhibaataada Abaarta.

2. Xaalufinta Badda iyo kaluumaysiga sharcidarada ah

Abaarta xun ee dalka ku habsatay ee ay hadal haynteedu badan tahay waxa dheer Abaar kale oo aamusan oo in muddo ahba ka socotay xeebaha dalka. Waxa badda la soo geliyey doonyo iyo maraakib si sharci daro ah uga kaluumaysa biyaha dalka Soomaaliya.

Xaaladaas waxa ay sababtay in dadkii dhaqaale ahaan ku tiirsanaa kaluumaysiga ay xaaladoodu adagtahay, ka dib markii ay waayeen meel bannaan oo ay badda ka galaan amaba la jarjaro shabaagihii ay dhigteen, lagana dejiyo doonyihiin ay wateen, lugana tilmaamo in ay yihiin burcad badeed.



Waxa Dalladda bulshada rayiydka ah ee PUNSAA ugu baaqaysa Dawladda Federaalka Soomaaliya in ay si dhaqso ah ugu hawlgasho dhicinta iyo difaacidda khayraadka iyo hantida ummadda Soomaaliyeed ee la boobayo.

3. Demoqaraadiyeynta iyo doorashooyinka Puntland

Waxa la asteeyey in sannadka 2019-ka ay doorasho ka dhacdo Puntland, iyadoo dadka loo sii bislaynayo wacyi ahaan xiligaas in ay gutaan waajibaadka iyo fulinta xaqa ay u leeyihiin in ay doortaan madaxdooda.

Guddiga Fulinta ee Punsaa waxa uu walaac ka muujiyey waqtiga isguraya iyo dhaqdhaqaaq la'aanta muuqata.

Dalladda PUNSAA waxa ay madaxda dawladda Puntland ugu baaqaysaa in la dedejiyo hawlaha Demoqaraadiyeynta, si aaney u dhicin in xiliga doorashadu hoosta inaga soo gasho iyadoo aan loo diyaargarobin, halkaasna ay dhacdo in filashadii bulshada reer Puntland ay hungo noqoto sida xiligii kan ka horeeyay dhacday taas oo PUNSAA ka diyaarisay cilmi baaris wixii ay u hirgali weyday Dimoqraadiyaddaas laganna faa'iidayasan karo xiligan.

Bulshadu waxa ay aad u danayneysaa hirgelinta hawlaha demoqaraadiyeynta iyo wacyigelinta dadka oo si dhaqso ah loo bilaabo.

4. Xeerka NGO-yada iyo ku dhaqankiisa

Dalladda Daneeyayaasha aan dawlaga ahayn ee PUNSAA waxa ay ugu baaqaysaa Haya'adaha ay khusayso in la dhaqangeliyo Xeerka NGO Act. Xeerkaas oo qeexaya wada shaqaynta Ururada Maxaliga ah iyo kuwa Caalamiga ah, islamarkaasna kala xadeynaya doorarkooda tartanka mashaariicda.

Diyaarinta xeerka NGO Act oo ay PUNSAA dowlad muhim ka qaatay diyaarintiisa waxa Madaxweynaha Puntland saxiixay 24/08/2016. kaas oo faafinta rasmiga ah ku soo baxay 25/08/2016.

Waxa PUNSAA ay Ururada Maxaliga ah ugu baaqaysaa in ay helaan Xeerka oo ay akhristaan, ku dhaqmaan, islamarkaasna difaacaan. Waxa sidaas oo kale ay Haya'daha Caalamiga ah ugu baaqaysaa in ay ixtiraamaan oo dhaqangeliyaan Xeerka. Waxa sidaas oo kale Dawladda Puntland loogu baaqayaa in ay u kuur gasho dhaqangelinta Xeerka.

Guddoomiyaha PUNSAA

Nuur Shire Cismaan

